

Doorashada dugsi



Saddex tallaabo oo kaa caawin kara inaad qoyskaaga u hesho dugsig wanaagsan





**Aqoonso
ikhtiyaarada**




**Booqo
dugsiyada**



**Codso oo
isqor**



Doorashada dugsi



Aqoonso ikhtiyaarada

Wax ka baro noocyada dugsiyada kala duwan

1 Dugsiyada degmada


Waa dugsi dadweyne oo bilaash ah oo ay maamulaan Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis. Guud ahaan waxay leeyihiin hanaan isqoris oo iskumid ah waxaanay u furan yihiin dhamaan ardayda laakiin waxay ku xadidnaan karaan aagaga juqaraafiyeed. Qaar kamida dugsiyada degmadu waa dugsiyada magnet-ka kuwaas oo bixiya mawduuc waxbarasho ama qaab waxbaris oo ka duwan, badankana waxay qoysaska ka doortaan goob imaansho oo weyn

2 Dugsiyada Jaartarka

Waa dugsi dadweyne oo bilaash oo ay maamulaan guddi agaasimayaal ka kooban oo aan macaash doon ahayn, waxaana kormeera “Amar-bixiye” (urur aan-macaash-doon-ahayn) Dugsi Jaartar ah oo ay ansixyeen Waaxda Waxbarashada ee Minnesota ama “MDE.” Way u furan yihiin dhamaan ardayda, dugsi kastaana wuxuu leeyahay hanaankiisa codsiga iyo isqorista ee u gaarka ah.

3 Dugsiyada madaxa-banaan

Waa dugsi gaar ah oo ay maamulaan guddi agaasimayaal ka kooban oo aan macaash doon ahayn. Waxay ka qaadaan ardayda lacagta waxbarista (laakiin badanka waxay taageero dhaqaale usoo bandhigaan qoysaska dakhligoodu hooseyo), ardayduna waa inay codsadaan dugsi kasta oo loo ogolaadaa inay galaan.



Sifooyinkee ayaad adiga aad kuugu muhiim ah?

Qor liis ka kooban dhamaan sifooyinka kuu muhiimka ah adiga iyo ilmahaaga. Miyay yeelashada barnaamij dugsiga kadib ahi kuu muhiim tahay? Miyay jiraan luqad aad rabto inuu ilmahaagu barto?

Waxa laga yaabaa in aanad helin dugsi la kulma dhamaan waxyaabaha ku jira liiskaaga, laakiin helida dugsi leh badi waxyaabaha aad doorbidayso ayaa kaa caawin doona helida dugsi u dhigma baahidaada.

Si aan kuu caawimo, waxaan sameynay tasmada dugsi kasta oo ku yaala Minneapolis – oo ay ku jiraan macluumaadkooda xidhiidhka, warbixinta kooban iyo xogta tacliinta iyo dadka.

Dib u eeg tasmada. Waxaan kugula tallinaynaa inaad aqoonsato dugsiyada la kulma shuruudahaaga. Kuwani waa dugsiyada aad doorbidayso. Booqo barta interneetka si aad macluumaad kale u hesho.

Tixgeli kuwan...

Dib u eeg tusmooyinka dugsiyada, wac dugsiyada iyo booqo bartooda interneetka



Hawlqabadka Tacliinta iyo xogta dadka

Heerarka tacliinta ee Minnesota waxa loogu talagalay inay qiimeeyaan haddii uu dugsi ardaydiisa u diyaarinayo, heerarkooda fasalada, guusha kulliyada iyo waayaha shaqada. Macluumaadka ku qoran tasmada dugsiga – waxa ku jira hawlqabadka tacliinta ee qiimeynta gobolka, heerarka qalinjebinta, darejeynta tacliinta iyo xogta dadka dugsigu – waxay kaa caawin karaan inaad aqoonsato sida wanaagsan ee uu dugsi u haqabtiri karo baahiyaha ardaydiisa iyo bulshada iyo sida uu u barbardhigmo dugsiyada kale ee Minneapolis iyo guud ahaan gobolkaba.

Dhaqanka iyo jawiga

Wax ka baro ujeedada dugsiga. Maxay yihiin waxyaabaha ay aaminsan yihiin, qiimahooda iyo malaha ku saabsan ilmahaaga? Sidee ayay usoo bandhigaan jawiga ugu fiican ee barasho? Dugsi kastaaba wuu ka duwanyay ka kale. Dugsiyada badiilka ahi waxay soo bandhigaan qaab waxbarasho oo caadiyan diirada saara u adeegida carruurta la halgamay (wax ku barashada) goobta waxbarasho ee caadiga ah sida lagu qeexay sharciga Barnaamijka Dhiirigelinta Qalinjebinta ee Minnesota.

Sharaxaada fasalka iyo barnaamijyada

Muxuu ilmahaagu baran doonaa iyo sidee ayuu dugsigu u qaabili doonaa baahiyihiisa waxbarasho iyo bulsheed? Sidee ayuu dugsigu wax uga qabtaa danayaasha gaarka ah, doonida iyo dhaqanka ilmahaaga ee manhajkiisa iyo barnaamijyadiisa? Waa maxay noocyada barnaamijyada iyo waxqabadyada manhajka ka baxsan ee la bixiyo?

Saacadaha dugsiga iyo gaadiid qaadista

Saacadaha, marka lagu daro barnaamijyada dugsiga kahor iyo kadib iyo gaadiid qaadista, dugsiyadu way ku kala duwan yihiin. Wac dugsiyada si aad u fahanto haddi qaabkoodu uu haqabtirayo baahiyaha qoyskaaga.

Doorashada dugsi



Booqo dugsiyada

La xidhiidh dugsiyada ku jira liiska aad doorbidayso oo jadwalka geli wakhti booqasho.

Marka aad soo booqanayso, hubi inaad weydiiso su'aalo badan. Dib u eeg waxkasta oo aad ka ogaatay dugsiyada oo go'aanso dugsiyada ku munaasibka ah qosyakaaga.

loogu talagalay waalidka, ka timid waalidka:


Su'aalaha ay tahay inaad weydiiso marka aad soo eegayso dugsi.

1 Sidee ayuu dugsiyada ugu qaabili karaa qaabka barashada iyo waxyaabaha uu xiseeyo ilmahaagu?

Dugsiyada wanaagsani way tartansiin karaan ilmahaaga, laakiin sidoo kale inuu haqabtiri karo baahiyihiisa oo uu ardaygaaga ka hawlgelin karo waxbarashadiisa. Dhamaan carruurta waxay leeyihiin qaab barasho oo kala duwan iyo waxyaabo ay xiiseeyaan. Waa maxay waxa laga maarmaanka ah ee adiga iyo ilmahaagu ay tahay inaad ka heshaan dugsiyada iyo maxaad dheeraysiin kartaa marka aad guriga joogto ama bulshada? Sidee ayuu manhajku u khuseeyaa waxyaabaha uu ilmahaagu xiiseeyo?

2 Sidee ayaad tacliinta ugu xidhaa xirfadaha noloshada dhabta ah? Sidee ayaad ardayda ugu diyaarisaa kulliyada, shaqada iyo noloshada qaangaarnimada?

Dugsiyada guduho waxay kukala duwan yihiin awoodooda ay ardayda ku baraan habka si fiican loo akhriyo, loo fahmo xisaabta, siday u noqon lahaayeen qaar u fekira si muuhima, iyo siday ardayda ugu diyaarin lahaayeen kulliyada iyo waayahooda shaqada. Xog noocee ah ayuu dugsiyada eegaa si ay u ogaadaan sida ay sameynayaan? Miyay bixiyaan tobabar shaqo oo kumeel gaadh ah, ama gaadhista kulliyada iyo fursadaha waayaha shaqada?



3 Jawi nooc ee ah ayuu dugsigu abuura si uu ula xidhiidho dhaqanka, jinsiga iyo qowmiyada ilmahayga?

Dugsi kastaaba wuu kaga ka duwan ka kale sida uu ugu maqsuudo ama uu ula xidhiidho ardaydiisa kasoo kala jeeda meelo badan. Iyado ku xidhan mudnaanahaaga, waxaad su'aali kartaa sida uu u dugsigu u abuuro fursado uu ilmahaagu ku barto wax ku saabsan kala duwanaanshaha ama sida ay dhaqano gaar ah ugu dareen manhajka dugsiga.

4 Intee in le'eg ayay macalimiintu dugsigaaga waxka barayeen? Waa maxay asalkoodu?

Waxku oolnimada macalinka ayaa ah qodobka dugsiga gudihiisa ugu mhiimsan ee guul-gaarida ardayga. Miyay macalimiintu yaqaanaan dugsiga, ardayda iyo qoysaska? Miyay wax barayaan ardayda? Tobabarka iyo taageerada joogtada ah ee macalinka ayaa saameysa dhaqanka fasalka iyo sharaxaada?

5 Waa maxay siyaasadahaaga anshaxu? Waa maxay heerarkaaga ganaaxida iyo eryidu/ceyrintu?


Sidee ayuu dugsigu wax uga qabtaa dhaqan xumada? Yaa maamumla dhaqanka? Sidee ayay u dhokumenti gareeyaan ulana xidhiidhaan waalidka walaacyada dhaqanka? Miyay marnaba wacaan saraakiisha booliska? Hadday sidaa tahay, xaaladahee?

6 Waa maxay barnaamijyada u diyaarka ah ilmahayga?

Laga bilaabo adeegyada latalinta ilaa isboortiga, dugsi kastaaba wuu ka duwanyay ka kale. Barnaamijyadee dugsiga kahor iyo kadib iyo waxqabadyada manhajka ka baxsan ayaa ilmahayga u diyaara? Miyay jiraan barnaamijyo uu dugsigu leeyay sii u ilmaahaga uga caawiya inuu u diyaargarooobo una galo kulliyad? Hadday sidaa tahay, waa kuwee (barnaamijyadaasi)?

7 Sidee ayaa waalidka loogu xiraa?

Soo noqnoqosho intee le'eg ayay macalimiintu ula xidhiidhaan waalidka? Miyay sameeyaan booqashooyinka guriga? Ma waxay waalidka kala xidhiidhaan horumarka tacliinta iyo bulsheed ee ilmaha – iyo kahor intaanuu ardaygu dib dhicin? Iyo sidee ayaa waalidka loogu daraa laga bilaabo shirarka ilaa hawlaha mutadawacnimada ah? Sidee ayay waalidku u noqon karaan qeyb kamida go'aan qaadashada dugsiga? Miyuu dugsigu bixiyaa wax kheyraad/illo/qalab loogu talagalay waalid.



Doorashada dugsi



Codso oo isqor

Isbar hanaanka (isqorista) dugsiyada aad daneynayso

Waxaan kugula tallinaynaa inaad codsato laba-saddex dugsi, maadaama laga yaabo in dugsiyada qaar aanay boos u helin dhamaan ardayda soo codsada. Kadib isqor hal dugsi.

Hubi inaad naftaada siiso wakhti kugu filan oo aad ku buuxiso wixii waraaqo ee loo baahanyay maadama uu hanaanka codsigu noqon karo mid u gaar ah dugsi kasta.

Dugsiyada degmadu waxay leeyihiin hanaan isqoris oo guud.


Dugsiyada Jaartarka iyo kuwa madaxa-banaan waxay isticmaalaan hanaankooda codsiga iyo isqorista ee u gaarka ah (tan macnaheedu waa inaad u baahan doonto inaad buuxiso codsi u gaar ah dugsi kasta oo aad daneynayso, dugsiguna wuxuu kula soo socodsiiin doonaa marka la gaadho wakhtigii aad buuxin lahayd waraaqaha isqorista).

Tallooyinka dheeraadka ah ee dugsiyada kala duwan...

Dugsiyada degmada

Ardaydu waxay isqoraan iyagoo u marayo hanaan isqoris oo guud iyagoo isticmaalaya ‘Foomka Codisga Dugsiga’

- Gudbi foomka marka aad ilmahaaga gelinayso fasalka barbaarinta ama aad dugsiyada badelayso.
- Wakhtiga kala-guurka ee dugsiyada dhexe ama dugsiyada sare, gudbi foom cusub haddii aad ilmahaaga qorayso dugsi aan loo nashqadeyn “wadiiqadooda” ama dugsi “bulsho”.



Isqoristu waxay ku saleysan tahay Aaga Degenaanshaha iyo 22 Meelood oo Degenaansho. Aaga iyo Meesha aad degantay ayaa laga yaabaa inay saameeyso sida fudud ee aad dugsi isqori karto. Degmadu waxay mudnaan siisaa ardayda raba inay waxka bartaan dugsi ku yaala meeshooda, kadib Aaga; ardayda raba inay waxka bartaan isla dugsiiga uu walaalkood/walaashood wax ka barto iyaguna sidoo kale waxay helaan mudnaan. Qaar kamid ah Dugsiyada Magnet-ka iyo barnaamijyada magaalo-weyntu mudnaanta ma siiyaan Aaga iyo Meesha.

Interneetka ka hel foomamka isqorista schoolrequest.mpls.k12.mn.us/documents/k-8_request_form_english.pdf (fasalada K-8) iyo [highschoolrequest.mpls.k12.mn.us/documents/hs_request_form_english.PDF](https://schoolrequest.mpls.k12.mn.us/documents/hs_request_form_english.PDF) (fasalada 9-12).

Wixii macluumaad intaa dheer booqo schoolrequest.mpls.k12.mn.us/home (fasalada K-8) iyo highschoolrequest.mpls.k12.mn.us/home2 (fasalada 9-12). Waxaad waxyaalahan ka codsan kartaa xafiisyada badi dugsiyada. Haddii aad rabto caawimo, la xidhiidh Xarunta Meelaynta Ardayga ee degmada: (612) 668-1840.

Dugsiyada Jaartar

Dugsi kastaaba wuxuu leeyahay codsi u gaar ah. Si aad u hesho codsiyada, booqo barta interneetka ee dugsiiga aad doorbidayso ama la xidhiidh adigoo isticmaalaya macluumaadka ku qoran tasmadiisa. Dugsiyadu way ku kala duwan yihiin wakhtiga codsiiga ee kama dambeysta ah (deadline).

Fiiro gaar ah: Dugsiyada jaartar uma baahna imtixaanka gelitaanka ama kuma xadidaan gelida iyadoo ku saleysan awooda garaadka ee ilmaha, cabirka guusha ama kartida ama awooda ciyaaraha.

Haddii tirada codsiyada uu dugsi jaartar ahi helo ay dhaafto awoodiisa, waxa la sameeyaa bakhtiyaa nasiib si loo go'aansado carruurta isqori karta iyo si loo sameeyo liiska sugitaanka haddiiba uu boos arday dheeraad ahi uu banaanaado.

Dugsiyada madaxa-banaan

Dugsi kastaa wuxuu isticmaalaa hanaankiisa isqorista ee u gaarka ah oo leh waxyaalo codsi oo u gaar ah. Sida dugsiyada gaarka ah, waxay leeyihiin shuruud gellid oo gaar ah. Waxa laga yaabaa inay codsadaan inay arkaan kaadhahka warbixinta ama inay ardayda mustaqbalka ka codsadaan inay soo booqdaan oo ay maraan wareysi.

Badi dugsiyada madaxa-banaani waxay qaadaan lacagta waxbarista, laakiin waxay usoo bandhigaan taageero dhaqaale qaar kamid ardayda. Haddii aad codsanayso caawimada dhaqaalaha, waxa laga yaabaa inay sidoo kale kaa codsadaan waxyaalaha codsiiga ee dheeraadka ah. Si aad u hesho isqoristan iyo codsiyadan, booqo barta interneetka ee dugsiiga aad doorbidayso ama la xidhiidh adigoo isticmaalaya macluumaadka ku qoran tusamadiisa.

Tallooyin: Haddii aad qabto max su'aal ah oo ku saabsan isqorista, si toos ah u mac dugsiiga aad doorbidayso.

Dugsiyada yareeya nusqaanta fursada



Dugsiyada kor u kacaya

Dugsiyadani waa kuwo kor u qaadaya ardaydooda; waxay leeyihiin natiijooyin tijaabo oo muujinaya inay isticmaalaan barnaamij tacliimeed oo adag, si fiicana u shaqeeya. Ku saleysan Qiimeynta Dhameyskatiran ee Minnesota, ama “MCA”, ardayda dugsiyadani waxay ka fiican yihiin kuwa caadiga ah ama waxay u korayaan si ka sareysa sidii la filayay. Ka fiiri (macluumaad) ku saabsan xisaabintan boggaga 16-21.

Nasiib daro, dhamaan dugsiyadu ma awoodaan inay muujiyaan natiijooyin tacliin adag oo dhamaan ardayda ah. Iyadoo tan la tixgelinayo, liiska dugsiyada kor u kacaya ee bogga danbe wuxuu diirada saaraa dugsiyada leh 40% ama inka badan oo ah ardayda loo aqoonsaday inay yihiin kuwa dakhliga hoose iyadoo loo marayo barnaamijka FRL. Dugsiyadani waxay muujiyeen guusha u adeegida qoysaska ugu baahida badan.

MCA waa tijaabada sannadlaha ah ee Minnesota si ay cabirto guul-gaarida ardayga. Hagahan, dhibcaha ardayda ayaa loo warbixiyay laba hab: aqoonta iyo korida. Ardayda loo tixgeliyo inay yihiin kuwo “aqoon” leh waxay la kulmeen heerarka dhamaan gobolka ee MDE u sameysay heerkooda fasalka. Dhanka Korida, MDE waxay ku cabirtaa intee inle’eg ayay barashada uu muujiyay ardaygu kortay iyadoo ku saleysan dhibcaha tijaabada sannadkii hore.

Qado Bilaash ah iyo Mid Qiimaheedu Hooseeyo

Tusmada dugsi kasta, waxaad ka heli doontaa boqoleyda ardayda hela Qado Bilaash ah ama Qiimaheedu Hooseeyo ama “FRL”. Tani waa qiimaha dawlada federaalka ee lagu lagu cabiro tirada carruurta kasoo jeeda qoys dakhligoodu hooseeyo. Waxay bixisaa micne ku saabsan sida uu waxqabadka tacliinta ee dugsi ay u saameeyso qaar kamida ah ardayda ugu baylansan magaaladeena. Liiskani wuxuu isticmaalaa heerka xadidida FRL oo ah 40% si uu u abuuro liis balaadhan oo ah dugsiyada muujiyay awooda ay ku haqab tiraan baahiyaha ardayda kala duduwan.

Tallo:

Marka aad baadhdo tusmada dugsiyada ee aad boqato dugsiyada, maxka meydii sida ardayda lamidka ah ilmahaagu ay sameeyaan tacliin ahaan.





Dugsiyadan Minneapolis waxay ardayda ugu baahida badan siiyaan waxbarasho wanaagsan

School	Grades	FRL rate	Page #
Anthony Middle School	6-8	42%	77
Bright Water Elementary	PK-6	49%	90
Cristo Rey Jesuit High School	9-12	89%	194
Dowling School	K-5	49%	99
Edison High School	9-12	86%	196
Fair Senior High	9-12	50%	199
Friendship Academy of the Arts	K-6	91%	105
Hennepin Elementary School	K-5	95%	112
Hiawatha College Prep	5-8	94%	114
Hiawatha Community – Howe Campus	3-5	50%	116
Hiawatha Leadership Academy – Morris Park	K-4	92%	117
Hope Academy	K-12	75%	120, 203
KIPP North Star Academy	5-8	92%	127
Lake Nokomis Community School – Keewaydin Campus	3-8	52%	132
Lyndale Community School	PK-5	70%	139
Marcy Open Elementary	K-8	52%	140
New Millennium Academy	K-8	82%	154
Pratt Community School	PK-5	66%	162
Ramsey Middle School	6-8	42%	164
Sanford Middle School	6-8	63%	166
Seward Montessori School	PK-8	54%	168
South High School	9-12	56%	220
Southside Family Charter School	K-8	48%	171
St. Helena Catholic School	PK-8	40%	174
Twin Cities International Elementary School	K-4	95%	180
Ubah Medical Academy	9-12	99%	222
Waite Park Community School	PK-5	55%	183
Washburn High School	9-12	44%	225
Windom Dual Immersion School	PK-5	48%	186

SCHOOL

Sida loo akhriyo tasmada dugsiyada

South High School

Basic information:

District school
Grades: 9-12
Hours: 8:20AM-3:10PM
Enrollment: 1,847
Tuition: None

Contact:

3131 19th Avenue S.
 Minneapolis, MN 55407

(612) 668-4300
 south.mpls.k12.mn.us

Highlights

- Offers extracurricular opportunities in athletics, music, theater, and visual arts
- Somali and Spanish bilingual program aides on staff
- Features Advanced Placement courses and post-secondary enrollment options
- Advancement Via Individual Determination (AVID) classes help students succeed in upper level classes and prepare for college



Academic performance

Math proficiency:	N/A
Reading proficiency:	14%
Growth:	0
5-year grad rate:	87%
Avg. ACT score:	20



Academic rating:
 HIGH POTENTIAL

Demographics

Asian students:	5%
Black students:	36%
Hispanic students:	19%
Native American students:	7%
White students:	33%
FRL rate	56%
Teachers of color:	10%

172



Changing-the-odds
 school



Breakfast




Uniforms



PreK

Hagahani waxa ku jira tasmada dugsi kasta oo ku yaala Minneapolis (marka lagu daro dugsiyada ka baxsan xuduuda magaalada ee u adeega ugu yaraan 50% ardayda degan Minneapolis). Inkastoo Dhamaan dugsiiga aan lagu soo koobin karin hal bog, tusmooyinku waxay bixiyaan macluumaadka aasaasiga ah – baaxada dugsiiga iyo xogta dadka, macluumaadka xidhiidhka iyo hawlqabadka tacliinta.



Tusmooyinku waa bar bilowga helida dugsi munaasib ku ah ilmahaaga.

A Warbixinta kooban

Sifooyinka = iyo barnaamijyada u gaarka ah dugsiiga. Dugsi kastaa wuxuu bixiyaa sifooyin aad uga badan kuwa halkan ku qoran, sidaa darteed u tixgeli liiskan bar bilow. La xidhiidh dugsiyada oo eeg bartooda internetka si aad waxbadan u ogaato. (Waxaan warbixinta kooban kasoo ururinay baraha internetka ee dugsiyada iyo wicitaano aan sameynay)

B Astaamaha

Waxay muujisa in dugsi uu bixiyo sifooyin muhiim ah, sida pre-K ama quraac. “Xidigtu” waxay sheegtaa in dugsiigu uu kor u kacayo. Hubi inaad weydiiso macluumaad ku saabsan sifooyinkan marka aad la xidhiidheysa dugsiyada aad doorbidayso.

C Aqoonta

Cabirada MCA ee aqoonta xisaabta iyo akhrinta ee ardayga – ayaa ah hal calaamad oo muujinaysa barashada ardayga. Gobolkeenu wuxuu u tixgeliyaa arday mid “aqoon” leh haddii uu la kulmo heerarka tacliinta ay fasalkooda u sameysay MDE.

Tusmooyinka dugsiiga waxay muujiyaan boqoleyda ardayda dugsi dhigata ee aqoon u leh xisaabta iyo akhrinta. Tusaale ahaan: haddii aqoonta xisaabta lagu qoray 62%, micnaheedu waa 62 kamid ah 100 kii arday ayaa aqoon u lahaa maadadaas. Marka uu sareeyo lambarkaasi waxay la micno tahay in ardayda dugsiigaasi ay gaadheen heerarka uu sameeyay gobolku.

Celceliska aqoonta akhrinta iyo xisaabta ee MCA (2016)

	Reading	Math
% ardayda Minnesota ee gaadhay heerka aqoonta	60%	60%
% ardayda degmada Minneapolis ee gaadhay heerka aqoonta	43%	44%

Fiiro gaar ah: “N/A” = ma jirto xog ama aanu awoodi waynay inaanu helno

Sida loo akhriyo tasmada dugsiyada (sii socda)



D Koritaanka

Waa cabirka sida ay ardayda dugsi ugu koraan tacliin ahaan sannad kasta ee dhinacyada xisaabta iyo akhrinta marka la isku daro. MDE waxay tan cabirtaa iyadoo isbarbar dhigaysa dhibcihii MCA ee hore iyo kuwa immika ee arday kasta. Kadib MDE waxay dhibcaha ardayga shakhsiga ah barbardhigtaa ardayda kale ee leh dhibco bilow oo lamid ah. Ugu dambeyn, MDE waxay isku celcelisaa dhibcaha koritaanka ardayga ee dugsi kasta, kadibna waxay barbardhigtaa heerarka fasalada isku midka ah (tusaale., dugsi hoose).



MDE waxay lambarka natiijada ah u badashaa dhibco u dhaxeeya eber iyo 100, halka ay 50 ka tahay celceliska koritaanka la filayo. Lambar kasta oo ka sareeya 50 wuxuu muujiyaa in koritaanka dugsiyaasi uu ka sareeyo heerka caadiga ah. Haddii uu lambarkaasi ka yar yahay 50, wuxuu muujiyaa in heerarka koritaanka ardaygu, celcelis ahaan uu ka hooseeyay koritaanka caadiga ah ee la filayay.

Dhibcaha koritaanu waa kuwii 2016

E Heerka qalanjabinta 5-ta sanno / dhibcaha ACT (dugsiyada sare)

Labadan cabir waxay muhiim u yihiin heerka dugsiya sare si loo fahmo sida fiican ee uu dugsi ardaydiisa ugu diyaariyo kulliyada iyo waayaha shaqada.

- Celceliska ardayda qalinjebiya shan sanno gudahood markii ay dugsiya sare bilaabeen (2015).
- Celceliska dhibcaha ACT, waa tijaabo qaran oo cabirta suurogalnimada inuu arday ku guuleysto kulliyada (2016).



Tallo

Waa muhiim inaad sidoo kale eegto koritaanka iyo aqoonta - khaasatan haddii heerka aqoontu uu hooseeyo, Koritaanka ayaa kaa caamin kara inaad fahanto sida dhakhsaha ah ee ardaydu u kordhinayaan xirfadahooda.

F Darajeynta tacliinta

Tusmooyinka dugsiyada waxa ku jira darajeynta tacliinta sida ay sheegayso xogta saddexda sanno ee aqoonta iyo koritaanka ee MCA iyo xogta ACT ee dugsiyada sare.

Dugsiyada leh xog ku filan oo la falanqeeyo waxay helaan mid kamida afarta darajeyn: Hawlqabad Sare, Karti Sare, Hawlqabad Dhexe iyo Hawlqabad Hoose. Darajeynta waxa la go'aansadaa iyadoo la eegayo xogta aqoonta iyo akhrinta MCA ee 3 sanno, kuna saleysan shuruudahan:

Darajeynta tacliinta:
HAWLQABAD SARE



Dugsigani wuxuu tacliin ahaan ardayda u qabtaa shaqo fiican. Ugu yaraan laba kamid ah saddexdii sanno ee lasoo dhaafay, dugsiyada wuxuu leeyay:

- Aqoonta MCA oo ka fiican heerka aqoonta ee dhamaan gobolka ama
- Dhibcaha koritaanka MCA ayaa ah 25% ugu sareeya dhamaan dugsiyada Minneapolis

Darajeynta tacliinta:
AWOOD SARE



Dugsigani wuxuu bixiyaa barnaamijyo tacliimeed fiican. Ugu yaraan laba kamid ah saddexdii sanno ee lasoo dhaafay, dugsiyada wuxuu leeyay:

- Aqoonta MCA oo ka fiican heerka aqoonta ee dhamaan degmada ama
- Dhibcaha koritaanka MCA oo ka fiican kala-badh dhamaan dugsiyada gobolka.

Darajeynta tacliinta:
HAWLQABAD
DHEXE



Dugsiyada waa dhexdhexaad ama uma muujiyo guul-gaarista ardayda si joogto ah. Malaha xog joogto ah oo muujinaysa hawlqabad fiican ama halgamid.

Darajeynta tacliinta:
HAWLQABAD
HOOSE



Dugsiyada si joogto ah ayuu ugu guul dareystaa inuu ardayda siiyo barnaamij tacliimeed oo adag. Ugu yaraan laba kamid saddexdii sanno ee lasoo dhaafay, dugsiyada wuxuu leeyay:


- MCA ku jirta 25% ugu hooseeya dugsiyada Minneapolis iyo
- Koritaanka MCA wuxuu ku jiraa 25% ugu hooseeya dugsiyada Minneapolis

Darajeynta tacliinta:
MID KALE



- XOG XADIDAN (darajeyn malaha) – dugsiyada leh tiro arday oo yar oo qaata MCA
- DUGSI CUSUB – dugsiyadan aan lahayn xogta saddexda sanno.
- DUGSI MADAX-BANAAN – dugsiyada gaarka ah loogama baahna inay sameeyaan MCA; dooro guul-gaarida ayaa lagu daray hoosta “warbixinta kooban” ee tasmadooda.

Tallo: Haddii uu dugsi ku jiro zeybta qiimeyn “kale” hubi inaad max ka meydiiso hawlqabadkooda tacliinta.



Sida loo akhriyo tasmada dugsiyada (sii socda)



F Darejeynta tacliinta ayaa sii socota

Dugsiyada sare, haddii inka badan 40% oo ardayda ahi ay doorbidaan in aanay ka qeybqaadan MCA, celceliska ACT ee dugsiyada ayaa go'aansada darajeyntiisa. Imtixaanka ACT waa tilmaamaha u diyaarsanaanta kulliyada waxaana guud ahaan lagu qaataa fasalka 11aad iyo/ama 12aad. Dhibcaha 2 ama 3 sanno waxay go'aansadaan darajeynta. Qaar badan oo kamida kulliyadahuu waxay tixgelinayaan dhibcaha 21 oo ah dhibcaha ugu hooseeya ee tilmaama u diyaarsanaanta kulliyada.

Dugsiyada sare eel eh dhibco celcelis oo u dhaxeeya 21-36 waxa loo tixgeliyaa inay yihiin kuwo hawlqabad sare, dhibcaha u dhaxeeya 18-20 waxa loo tixgeliyaa inay yihiin kuwo Karti Sare iyo dhibco celcelis ahaan ah 17 ama ka hooseeya lama darajeyn. Dhibcaha laba kamida saddexda sanno ayaa go'aansada darajeynta.

Tallo: Marka aad dib u eegayso dhamaan xogta ku saabsan dugsiyada. Way adag tahay in la go'aansado waxa uu yahay waxa ugu muhimsani. Si kastaba ha ahaatee, marka la eegayo aqoonta iyo koritaanka MCA ee saddexda sanno waxay bixisaa macluuaad kooban oo ku saabsan guul-gaarideeda tacliinta.


G Xogta Dadka

Isqorida ardayga, jinsiyada/qowmiyada iyo macluumaadka maclamiinta waxa laga keenay diiwaanada MDE ee sannad dugsiyeedkii 2015-16 waxaana laga yaabaa in aanay ka turjumin xogta dadka dugsiyada ee waaktigan:

- Xogta dadka ee ardayga – ardayda waxa loo aqoonsadaa mid kamid ah 5 qowmiyadood ee Minneota (oo ku saleysan waraaqaha isqorista ee ay buuxiyeen waalidku)
- Heerka FRL – waxa go'aansada tirada ardayda u qalma qado bilaash ama qiime hoos loo dhigay ah (oo ku saleysan xaalada taageerada bulshada ama foom ka buuxinta dugsiyada).
- Macalimiinta midabka leh – boqoleyda macalimiinta aan loo aqoonsan inay cadaan yihiin (tiradani kaliya waa macalimiinta liisanka heysta ee kama turjunto kala duwanaanshaha dhamaan shaqaalaha).

Tallo: Qoysas badan ayaa daneeya dugsiyada dhaxan ahaan kala duduman. Marka aad boqanayso dugsi, hubi inaad max ka meydiiso kala dumanaanshaha shaqaalaha iyo ardayda. Boqoleydan la qoray ma sheegto sheekada oo dhan.

WWW.



Wax badan ka baro halkan rc.education.state.mn.us. Bartan internetka ee MDE waxay bixisaa qalab aad wax kaga baran karto dugsiyada Minnesota sida “Kaadhka Warbixinta Minnesota” – macluumaad ku saabsan dugsiyada shakhsiga ah, marka lagu daro cabirka guul-gaarida ee loo jajabin karo xogta dadka. Bartan internetku waxay u fiicantay waalidka iyo cidkasta oo rabta inay wax badan ka ogaato guul-gaarida dugsiyada shakhsiga ah.

Miyaad heysaa warcelin ku saabsan Dugsi Hellaha Minneapolis? limeyl noogu soo dir cinwaankan info@MinneapolisSchoolFinder.org ama naga soo wac **(612) 643-1305**.